

## Shaqaalaynta

Waaxda Waxbarashada ee Minnesota waxay xafiiskeeda labada magaalo ee mataanaha ee xafada Rosville ka shaqaalaysiisaa qiyaasti 400 oo shaqaale. Shaqaalahena wuxuu u adeegaa macaamiil balaaran oo kala duwan kuna jiraan 850,000 pre-K ilaa ardayda fasalka 12 iyo waalidiinta ama dadka ka mas'uulka ah; 339 dugsi degmo; 52,781 macalin oo leysanka (license) waxbarida haysta; 1,835 dugsiyada bulsha weynta; 82,000 dadka waweyn ee waxbarta ee ka qayb gala waxbarashada asaasiga ee dadka waweyn; iyo 118,214 da'yarta iyo qoysaskooda ee ka qayb gala waxbarashada hore loo galo.

Waaxda Waxbarashada ee Minnesota waa meel loo siman yahay shaqaalaysiinta. Hoos ka Fiiri talaboonyin Hay'adda sharci xaqiijinta (agency's affirmative action plan).

### Sidaad u codsan lahayd

Si taxadir leh u akhri shahadooyinka u yar ee loo rabo shaqooyinka la soo dhajiyay si loo hubiyo in aad haysatid shahaadadii la rabay. Habka loo xusho wuxuu ku xiran yahay resume-gaaga iyo iswaafajinta xirfada shaqada iyo shahaadada.

> [Fiirso jagooyinka banaan ee Gobolka Minnesota.](#)

Waaxda Waxbarashada ee Minnesota bosaska/jagooyinka ka banaan waxaad dhakhso uga heli kartaa markaad isticmaasho "Filter by" eed ka arki bidixdaada boga (page) shaqo raadinta. Hay'adda hoosteeda (Under Agency) dooro "more" ka dib "Education).

Nagala soo xiriir 651-582-8200. Haddii aad u baahato tarjumaad fadlan u sheeg soo dhaweynta afkaad ku fahmi kartid.